



Majiro cudur iskii u kala gudba, majirto in la baasaysto shimbiraha ama guumeysta iyo in la baasaysto bisha safar, ugana carar qofka qaba juudaanka sidaad uga cararto libaaxa

Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "Majiro cudur iskii u kala gudba, majirto in la baasaysto shimbiraha ama guumeysta iyo in la baasaysto bisha safar, ugana carar qofka qaba juudaanka sidaad uga cararto libaaxa."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey falalkii jaahiliyyada qaar ka mid ah isagoo ka digaya, wuxuu kaloo cadeeyey in wax walba gacanta Ilaahay ku jiraan, oo wax walba Ilaahay amarkiisa iyo qadarkiisa ku ahaanayaan, waana: Mida 1aad: waxay aamin sanaayeen inuu cudurku iskii u gudbo, Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-wuu ka reebay dadku inay rumeyyaan in jiradu qofka jiran iskeed uga gudubto oo qof kale aado, balse Ilaahay ayaa maamula aduunkaan, isaga ayaana soo dajiyu cudurka isaga ayaana qaada, arinkaasi ma dhici karo inuu Ilaahay iraadadiisa iyo amarkiisa ku ahaado mooyee. mida 2aad: dadkii jaahiligu waxay ahaayeen hadii ay safar ama ganacsi u baxayaan, waxay duulin jireen shimbir, haduu midigta u duulo way bishaaraysan jireen, haduuse xaga bidix u duulo way baasaysan jireen oo ka laaban jireen, Nabigu scw wuu ka reebay baasaysigaa shimbiraha, wuxuuna u cadeeyey inay caqiido baadila tahay. Mida 3aad: dadkii jaahiligu waxay oran jireen: hadii shimbirka guumaystu soo fuusho guri musiibo ayaa ku dhacaysa reerka guriga leh, Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuu ka reebay baaseysigaas. Mida 4aad: Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu reebay in la baasaysto bisha Safar, waana bisha labaad ee bilaha qamariga ah, waxaa kaloo la yiri: safar waa abeeso gasha caloosha, oo ku dhacda xoolaha iyo dadkaba, waxay sheegi jireen inay ka faafi og tahay cudurka cadhada, Nabiguna-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuu ka reebay caqidadaas. Mida 5aad: Nabigu scw wuxu amray in laga fogaado qofka qaba cudurka Juudaanka sida looga fogaado libaaxa, taasina waa in nafta loo dadaalo oo la dalbo bad qabkeeda oo la sameeyo ficolka Ilaahay amray, juudaanku waa cudur xubnaha dadku ay is cunaan.

النّجّات الخيريّة
ALNAJAT CHARITY

